Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
GolahaShacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kal.8-aad kul.15-aad **08/06/2016**

Kalfadhiga 8-aad
Kulankiisa15-aad Saac.fur.11:39gh.Saac.Xir.4:45gd.
Guntinta(Quorum) 151 Xildh.
Ajendaha:-

1. **Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **U codeynta Heshiiska Dalalka Afrika Bari loogu dhisayo Ciidamo gurmad ah**
4. **U codeynta Mashruuc Sharci waxka baddalid Dastuur**
5. **Akhrinta 3-aad Sharciga lagu dhisayo Maxkamadda Dastuurka**
6. **Akhrinta 3-aad Sharciga xuquuqda siyaasiyiinta**

1.Shir-guddoomiye, Guddoomiye k/xigeenka Baarlamanka JFS Mudane Jeylaani Nuur Iikar .

2.waxaa shirka furey Guddoomiye k/x. Baarlamanka JFS Mudane Jeylaani Nuur Iikar ,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah ,uuna akhriyey Xildhibaan Maxamed Cumar Dhalxa. Wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo xildhibaanadana way ansaxiyeen.

3.Guddoomiye Jeylaani ,wuxuu sheegay in maanta ay taariikhdeedu tahay 8 bisha 6aad 2016-ka waxaa soo xaadirtey 151, iyagana wuxuu sheegay in ay doonayeen in ay helaan quorum(Guntin) 190 ah ,taasina wuxuu ku tilmaamey in ay tahay nasiibdaro .Wuxuu intaa ku darey in Ajendaha maanta uu yahay u codeynta heshiiska dalalka Afrika Bari loogu dhisayo Ciidamo Gurmad ah ,u codeynta Mashruuc Sharci wax ka bedelid Dastuur,Akhrinta 3-aad Sharciga lagu dhisayo Maxkamadda Dasturka iyo Akhrinta 3-aad Sharciga Xuquuqda siyaasiyiinta , dooda shalay halkii ay joogtay laga sii wadaayo.kadibna waxaa bilaabatey doodii xildhibaanada .

Xildh. Maxamed Cabdulle Faarax geeseey ,wuxuu sheegay in qeybta mashruuca wax ka bedelka Dastuurka haddan aanan joogin kooramka lagu ansaxin lahaa ,wuxuu soo jeediyey in meesha laga saaro mashruucaas sharci ee wax ka bedelka dastuurka ,wuxuu soo jeediyey maadaama loo baahanyahay codeynta 2/3,in qodobkaas meesha laga saaro.tankale u codeynta heshiiska dalalka Afrikadda bari uu dhisayo ciidamo gurmad ah ,wuxuu soo jeediyey in dood laga furo maadaama uu maray akhrinta 1-aad fadhigii kan ka horeeyey lagu akhriyey doodna weli aan laga gelin u codeyn waxaa ka horeysa dood ay tahay in laga doodo. Ajendaha in codeyn laga dhigin oo laga dhigo dood.

4.Guddoomiye Jeylaani ,wuxuu sheegay in iyaga ay u codeeyeyn Ajendaha uu ku furmayo kooramka,laakiin u codeynta mashruuca sharci ee Dastuurka aan loo haynin Kooram sidaa ayuu dib ugu dhacayaa,maalintii horeyna sidaa ayaa dib loogu dhigay, waana laga sii gudbayaa.codeynta waa heshiis ,heshiisna ma maro akhrinta 1-aad,2-aad iyo 3-aad sharci ma aha , waa heshiis hal mar markii la akhriyo waxaa lagu wareejiyaa guddiga difaaca ,guddiga difaaca ayaa loo baahanyahay maanta in ay halkaan ka sheegaan haddii loo codeynaayo iyo haddii kale, habka lagu shaqeeyo waa intaas.

Xildh. Maxamed Cabdi Yuusuf ,wuxuu sheegay in uu sakangareynaayo xildhibaankii isaga ka horeeyey arrinta uu rabo in uu caddeeyo waxaa weeye waxaa la yiri dowladdaha East Africa waxay sameysanayaa heshiis gurmad la yiraahdo marka ugu horeysa dadka aad heshiiska la geleysid aad wax ku diidikartid ciidanka iyo awooda iyo dhaqaalaha ay leeyihiin aad leedahay ayaa heshiis lala galaa,anaga waxaan nahay dad gacanta lagu hayo ,hadda ka horna wuxuu sheegay in lagu diiday ciidamo safka hore ah in ay soo galaan Soomaaliya waxaana lagu diiday Magaaladda Baydhabo in aysangurmad u imaanin .waa sharcidaro oo lagu xad gudbaayo ga'aan Baarlamaanka ,wuxuu soo jeediyey in Ajendaha laga saaro.

Xildh.Maxamed Cabdi Yuusuf, wuxuu sheegay in marka hore uu sakangareynayo Xildhibaankii isaga ka horeeyey arrinta uu rabo in uu caaddeyn ka bixiyo waxay tahay arrinta gurmadka, Dowladaha East Afrika waxay sameysanayaa heshiis gurmad la yiraahdo ,iyaga sida ay la socdaan dowladda marka awood la simantahay markaad heshiiska la geleyso oo wax ku diidikartid oo ciidanka iyo awooda ay leeyihiin iyo dhaqaalaha aad leedahay ayaa heshiis lala gala ,anaga waxaan nahay dad gacanta lagu haayo ,hadda ka horna waa lagu diiday Baydhabo in wadamada deriska ah la keeno Soomaaliya in gurmad aysan ku imaanin Baaralamanka ayaa laga ansixiyey ,hadda iyagoo sharcidara ah ayaa dalka la keenay waxaa la rabaa in la ansaxiyo in sharcidaro dalka ku joogaan waa sharcidaro lagu xadgudbaayo baarlamaanka in la ansaxiyo ma qabo wuxuu qabaa in Ajendaha laga saaro .

5.Guddoomiye Jeynlaani wuxuu sheegay in heshiiska kooma(,) lagama bedelikaro,waxba golaha kama bedelikaro laakiin Golahu waa diidikaraa.wuxuu weydiiyey haddii cid ka joogto guddiga Difaaca Baarlamanka oo shalay lagu wareejiyey .maadaama guddiga difaaca aynan wax ka joogin wuxuu soo jeediyey in laga gudbo.dib ayaa loo dhigay maadaama ay maqanyihiin Guddiga difaaca.

6.Guddoomiye Jeylaani, wuxuu u yeeray Xildhibaan Maxamed Amiin si uu u akhriyo sharciga lagu dhisaayo Maxakamadda Dastuuriga oo maraaya akhrintiisa 3-aad.

Xildh. Kulalihi (Point of order),wuxuu sheegay in halkaan ay ka jirto Mas'uuliyad daro ,wuxuu intaa ku darey in uu sakangareynaayo Xildh. Maxamed Cabdi Yuusuf ,xaaladda hadda lagu jiro waxaa la qarinayaa haloo gurmaddo Ummadda Soomaaliyeed, ma aha in la yiraahdo aan ka gudubno waa in loo codeeyaa oo la yiraahdaa kan kumaa jirno,guddigaana wuxuu u baaqdey isaga ayey u taalaa,waxay la dhuu-dhuumanaayaan iyagey u taalaa, golaha waa ka madaxbanaan yahay.

7.Guddoomiye Jeylaani ,wuxuu markale u yeeray Xildh. Maxamed Amiin si uu u akhriyo Sharciga lagu dhisayo Maxkamadda Dastuuriga oo marayo Akhrintiisa 3-aad .

Xildh. Maxamed Amiin ,wuxuu akhriyey Sharciga lagu dhisayo Maxakamadda Dastuuriga .wuxuu si faah-faahsan u akhriyey in guddiga ,dib u eegista lagu dhisaayo maxkamadda dastuuriga Guddiga Garsoorka Owqaafta iyo Arrimaha Diinta markuu si qoto dheer ugu howlgaley dib u eegista sharcigaan wuxuu sheegay in qod. 68-aad faqr.3-aad ee dastuurka iyo qodbada 61,62 xeer-hoosaadka Golaha shacabka ,guddiga wuxuu dib u eegis ku sameeyey sharcigaan ka dib markii ay wasaaradda garsoorka ay u soo gudbisey sharcigaan Golaha shacabka taariikhdu markey aheyd 25.5.2013kii . wuxuu soo marey 30.05.2013kii akhrinta koowaad hindise sharciyeedkaan lagu dhisaayo Maxkamadda Dastuuriga waxaa Golaha ka hor akhriyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka mudane C/llaahi Aabyan Nuur ,isagoo cuskanaaya qod.45 faqr.1-aad ee Xeer-hoosaadka ,guddoonka Golaha shacabkana wuxuu u soo gudbiyey Guddiga Garsoorka isla taariikhdaas 30.05.2013.Guddiga qodob-qodob ayuu u dul istaagay .taariikhu markey aheyd 20.01.2014 ayaa dib loogu soo celiyey guddiga ,waxaa kaloo dib loogu soo celiyey 10.10.2014,wuxuuna dib u eegis ku sameeyey dhammaan qodobada dhanka siiqada iyo nuxurka wuxuuna ku soo kordhiyey faqrado iyo qodobo cusub oo dheeraad ah sida ku xusan lifaaqa. Muddada xilhaynta Guddoomiyaha iyo k/xigeenadiisa uu yahay 5 sano.

8.Guddoomiye Jeylaani ,wuxuu u yeeray Guddiga Xeer-hoosaadka si ay u akhriyaan akhrinta 3-aad sharciga xuquuqda siyaasiyiinta . Balse, waxaa la waayey guddiga ,Xildhibaan Yuusuf oo ahaa xubin ka mid ah Guddiga ayaa soo istaagey oo sheegay in guddoomiyaha uusan joogin, waxbadanna uusan kala soconin arrimaha Xeer-hoosaadka waayo wuu wuxuu sheegay in uu ku cusubyahay Guddiga , wuxuuna codsadey in dib loogu dhigo,Guddoomiye Jeylaanina wuu ka ogolaadey Codsigooda .

9.Guddoomiye Jeylaani , wuxuu sheegay in maanta howshooda aysan u dhicin sidii maalintii hore codeynta mashruca wax ka bedelka dastuurka ay shegeyn in loo baahanyahay 2/3 waa la la'yahay.u codeynta heshiiska dalaka Afrika Ajendaha maanta ku jirey waa heshiis micnaheedu wuxuu yahay

Heshiia Baarlamanka wuxuu ka bedelikaro malaha balse wuxuu awood u leeyahay ansaxiyo ama diido,guddiga difaacana lama haayo .akhrinta 3-aad maxkamadda dastuuriga waxaa la sheegay in aan la haynin xildhibaano badan saa darted laga dhigidoono u codeynteeda iyo ka doodistooda maalinta sabtida .

Akhrinta 3-aad sharciga xuquuqda siyaasiyiinta waa akhrintii ugu fiicneed sharcigii la rabey xaqa siyaasiga uu yahay, xildhibaanadii horey oo baxay oo banaanka maanta daadsan, Ninkasta oo soo gali waayo xuquuqdiisa ayuu helilahaa, maalinta sabtiga ayaa laga dhigayaa si aan u soo gaabsano waxaa lagu jiraa ramadaan,waa shahrul cibaado, sharciyada yaalo haddii layska gudbiyo waa la fasax tagayaa cibaado ayaa la aadayaa ,wuxuu soo jeediyeyin la fududeeyo.

Kalfadhiga 8-aad kulankiisa 15-aad uu shir-guddoominaayey guddoomiye k/xigeenka 1-aad mudane Jeylaani Nuur Iikar wuxuu sheeggay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 2;17GD.